

Doorashada fasalka dugsiga xannaanadda waxaa lagu dhaqaaqi doonaa bisha jannayo 2020

Bisha jannayo 2020 ayaa lagu siin doonaa fursad aad ubadkaaga ugu doorato fasalka dugsiga xannaanadda.

Fusadda waxaad heli doontaa iyadoo xiriiriyaha adeegga elektroonikada bogga internetka Dowladda hoose Östersund ah. Fursadda Adeegga elektroonikada waxaa albaabka loo furi doonaa laga bilaa 13 jannayo waxayna ku egtahay 26 jannayo.

Waa inaad haysata aqoonsiga elektroonikada ah [e-legitimation]

Haysashada aqoonsiga elektroonikada ah [e-legitimation] ama [mobilt bank-id] waa lagamaarmaan. Waxaad ka codsan kartaa bangiga ama Hay'adda canshuuraha [Skatteverket]. Waxrbixin dheeraad waxaad ka aqrisan kartaa www.e-legitimation.se

Ogeysiis! Markii aad adeegsanayso adeegga elektroonikada waa inaad sheegta adreska emailkaaga.

Qof kamid ah xilhaayaha xannaanadda/waalidka ayaa doorashada ku dhaqaaqi doono, kaddib waalidka kale ayaa isagoo adeegsanayo adeegga elektroonikada xaqiin doono doorashada. Dhamaadka bisha febraayo ayaa email ama warqad la idinku wargelin doonaa dugsiga ubadkiina lagu meeleeay.

Maamulka dugsiga ubadkiinna lagu meelayay wuxuu xilliga gu`ga 2020 idinku yeeri doonaa shir warbixineed.

Ubadkayga boos ma laga siin doonaa dugsiga aan uu doortay?

Haddii ay suurtagal tahay waxaa ardayga boos ka siin doonaa dugsiga uu waalidkiisa u doortay. Haddii tirada ardayda boos ka codsaday dugsiyada ay Dowladda hoose maamusho ka badan tahay boosaska la heli karo, waxaa lagu dhaqma nidaamka u dhowaanshada. Sida hoyga iyo dugsiga isugu dhow yihiin. Warbixin dheeraad oo ku saabsan nidaamka aqbalida iyo sida loo turjumo u dhowaanshada ee dugsiyada Dowladda hoose ee Östersund waxaa laga aqrisan karaa: www.ostersund.se/skolval

Dugsiyada madaxbannaan ee degmada ku yaallaan nidaam iyaga u gaar ah ayaa u degsan. Warbixin dheeraad ah kala xiriir dugsiga kasta oo arrinta u gaar ah.

Haddii aad caawinaad ubaahan tahay

Haddii aadan kombyuutar haysan ama u baahan tahay caawinaad shaqsiyeed xiriir la leh doorashada Fasalka dugsiga xannaanadda waad heli kartaa. Xaaladaas ballan qabso adigoo la xiriira xarunta macaamiisha

- e-mail: kundcenter@ostersund.se
- taleefan: 063-14 30 00.

Ama waxaad booqan kartaa Xarunta macaamiisha oo ku taallo Österäng, Förlandsgränd 1C. Markii aad xarunta booqanayso la kaalay kaarka aqoonsiga oo sax ah.

Warbixin dheeraad oo ku saabsan Fasalka dugsiga xannaanadda waxaad ka aqrisan kartaa: www.ostersund.se/skolval

